



# Ha moogaanin! Ka faa'iidayso KAREDIT-KA CARRUURTA IYO QOYSASKA SHAQEELYA!

Xitaa haddii aadan waajib kugu ahayn inaad xarayso canshuuraha dakhliga ee Minnesota, weli waad dalban kartaa faa'iidooyinka canshuurta ee qiiimaha leh. Karedidka Qoysaska Shaqeeeya iyo Karedidka Carruurta waxay bixiyaan dhimista canshuurta dadka dakhligoodu ka hooseeyo heer go'an. Labada Karedidka waa la soo celin karaa (refundable), taasoo la micno ah inaad heli karto soo celin xitaa haddii aadan wax canshuur ah bixin.

## Bixinta Hore ee Karedidka Canshuurta Carruurta

Waxaad dooran kartaa inaad hesho qayb ka mid ah Karedidka Canshuurta Carruurta ee sannadka xiga iyada oo loo maro saddex bixino hore kahor intaadan gudbin canshuurtaada sannadlaha ah. Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, booqo [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) oo ku qor Advance Payments sanduuqa raadinta.

## Waa maxay Karedidka Canshuurta Carruurta?

Karedidka Canshuurta Carruurta waxaa heli kara dadka reer Minnesota ee leh carruur ka yar 18 sano. Haddii aad gudbiso canshuurta Minnesota, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto \$1,750 halkii ilmo iyadoo aan xadiidnayn tirada carruurta aad heysato.

## Waa maxay Karedidka Qoysaska Shaqeeeya?

Karedidka Qoysaska Shaqeeeya waxaa heli kara dadka reer Minnesota ee sanadkii dakhli kasbaday. Karedidka ugu badan ee Qoysaska Shaqeeeya waa \$379 haddii dakhligu yahay \$9,480 ama ka badan. Wawaana suurtagal ah inuu kordho iyadoo lagu saleynayo qodobo kale.

- \$350 Haddii aadan lahayn ilmo u qalma
- \$1,000 Haddii aad leedahay hal ilmo oo 18 jir ama ka weyn
- \$2,270 Haddii aad leedahay laba carruur ah oo 18 jir ama ka weyn
- \$2,710 Haddii aad leedahay saddex ama ka badan carruur ah oo 18 jir ama ka weyn

Labada Karedidka Canshuurta Carruurta iyo Karedidka Qoysaska Shaqeeeya waxay hoos u dhacaan haddii dakhligu dhaafio heerarka soo socda: \$37,910 haddii aad tahay lamaane is qaba oo si wadajir ah u gudbinaya ama \$31,950 haddii aad tahay qof kale oo canshuur gudbinaya (Karedidka waxaa hoos loo dhigi doonaa 12% dakhligii aad kasbatay ama wadarta guud ee dakhligii la hagaajiyay (AGI), midka sareeya labadooda.

## Sideen u dalban karaa Karedidka?

Si aad u dalbato labadaba Karedidka Canshuurta Carruurta iyo Karedidka Qoysaska Shaqeeeya, isticmaal Schedule M1CWFC, Minnesota Child iyo Working Family Credits.

## Diyaarinta Canshuurta Bilaashka ah

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto bixinta adeegyada diyaarinta canshuurta ee bilaashka ah! Booqo [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) ku qor free tax preparation sanduuqa raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta canshuurta ee bilaashka ah ee kugu dhow.